Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuu u wayso qaadan jiray Salaad walba

Camar Binu Caamir wuxuu ka wariyey Anas Binu Maalik inuu yiri: Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuu u wayso qaadan jiray Salaad walba, waxaan ku iri: maxaad sameyn jirteen?, wuxuuna yiri: waxaa ku filnaa midkayo waysadiisa mar hadaanay ka jabin.

[Xadiis Saxiix ah] [Waxa wariyay Albukhaari]

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee Salaad walba oo faral ah wuu u weyso qaadan jiray, xataa hadaan waysadu ka jabin, waana si uu uga helo ajar iyo fadli. Waxaa banaan in lagu tukado hal weyso Salaadaha faral ka ah hal ka badan intuu weysadiisa qabo.

http://www.sunnah.global/hadeeth/so/show/65080